



Degmada Oslo Waaxda waxbarashada

Ku waalidka/mas'uuliyiinta ardayda iskoolka billaabaya iyo ardayda fasallada 2-aad-4-aad ee iskoolka x sanad dugsiyeedka 2020/2021

Oslo, 17.02.2020

WARBIXIN KU SAABSAN DEEQ BOOS BAR AH OO BILAASH AH EE ISKOOLKA FIRFIRCOONIDA LAKKEGATA AKS EE FASALLADA 1-AAD- 4- AAD SANAD DUGSIYEEDKA 2019/2020

Dhammaan carruurta billaabaysa fasalka 1-aad, fasalka 2-aad, fasalka 3-aad iyo fasalka 4-aad ee iskoolka x, waxaa loogu deeqayaa boos bar ah oo bilaash ah oo laga siinayo iskoolka firfircoonida (AKS) sanad dugsiyeedka 2020/2021. Deeqdu waxay dhaqan gelayaa laga billaabo 1-da agoosto 2020-ka.

Waa maxay booska barka ah ee bilaashka ah ee AKS?

- Ardaygu maalin walba AKS ayuu joogi karaa iskoolka ka dib, wuxuuna joogi karaa ilaa iyo 12 saac toddobaadkiiba. Saacadaha si isle'eg ayaa maalmaha loogu qaybin doonaa.
- Ardaygu toddobaadkiiba laba maalmood ayuu AKS joogi karaa marka uu iskoolku xiran yahay (fasaxa dayrta- iyo midka qaboobaha, fasaxa ciidaha masiixiga ee jul- iyo p ske iyo fasaxa xagaaga marka laga reebo bisha luuliyo, oo uu AKS xiran yahay).
- Maalmaha qorshaynta/maalmaha u dhexeeya laba maalmood oo fasax ah ee sanad dugsiyeedka wuxuu ardaygu AKS joogi karaa maalin   ah.

Haddii aad doonaysaan in uu ilmuhu in intaan ka badan AKS joogo, boos buuxa ayaad gadan kartaan iyada oo qiimaha la idinka dhimi doono.

Boos buuxa oo qiimaha la dhimay

Qiimaha booska buuxa wuxuu ku xiran yahay dakhliga waalidka/mas'uuliyiinta ilmaha, wuxuuna noqon doonaa inta u dhexaysa 242 ilaa 1029 karoon bishiiba. Haddii uu ilmuhu boos buuxa haysto wuxuu AKS joogi karaa wakhtiga iskoolka ka hor iyo ka dib ba, iyo maalin walba marka uu iskoolku xiran yahay (marka laga reebo bisha luuliyo).

Ka-qaybqaadashada oo korodha iyo aqoonta luuqadda oo sare loo qaado

AKS waa goob wax lagu barto halkaas oo ciyaar iyo waxbarasho sare loogu qaadayo horumarka maaddo iyo midka bulsho ee ilmaha. AKS wuxuu bixinayaa deeq is-raacsan taas oo iskoolka lala kaashanayo.

Hadafka laga leeyahay ka-qaybqaadashada bilaashka ah ee AKS iskoolka ka dib waa:

- in sare loo qaado aqoonta luuqadda ee ardayga
- in la kordhiyo ka-qaybqaadashada AKS
- in sare loo qaado tayada AKS oo la hubiyo deeq isku mid ah

Waaxda waxbarashada

Ciwaanka booqashada:
Grensesvingen 6
0602 OSLO
Ciwaanka boostada:
Pb 6127 Etterstad, 0602 OSLO

Teleefan: 21 80 21 80
Tellefakis. 22 65 79 71

postmottak@ude.oslo.kommune.no
www.ude.oslo.kommune.no

Hey'adlamar: 976820037



Degmada Oslo Waaxda waxbarashada

Sidaan ayaad boos uga codsanaysaa AKS

Marka ay waalidku/mas'uuliyiinta ilmuhu AKS ilmo ku qorayaan waxay isticmaalayaan bogga internetka ee degmada Oslo www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/sok-plass-pa-aktivitetsskolen.

Warbixin intaan ka badan oo ku saabsan iskoollada bixiya ka-qaybqaadashada AKS ee bilaashka ah ee fasallada 1-aad-4-aad eeg <https://www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/gratis-deltakelse-etter-skoletid>. Iskoolka la xiriir haddii aad wax su'aal ah qabto.

Waaxda waxbarashada

Ciwaanka booqashada:
Grensesvingen 6
0602 OSLO
Ciwaanka boostada:
Pb 6127 Etterstad, 0602 OSLO

Teleefan: 21 80 21 80
Tellefakis. 22 65 79 71

Hey'adlambar: 976820037

postmottak@ude.oslo.kommune.no
www.ude.oslo.kommune.no